

## Qorshaha Samatabixinta Mareykanka (ARP) Needs Assessment - Soomaali

Inta lagu gudajiray sannad-dugsiyeedka 2020-21, Dugsiyada Dadweynaha ee Saint Paul (SPPS) waxay ardayda, shaqaalaha, qoysaska iyo xubnaha bulshada kala shaqeyeen wax ku saabsan waxbarashadooda, xag shucuur ahaan iyo xag bulsho ahaanba inta lagu gudajiray iyo baahiyo kale ee soo baxay intii lagu jiray iyo wixii ka dambeeyayba cudurka faafa ee COVID-19. Hawshaan waxaa loo yaqaannay qiimeynta baahiyaha jira. Waxaa ku jiray habab kala duwan oo cilmi baaris iyo qiimeyn ah, oo ay ku jiraan su'aalo jawaabahooda la buuxinayay, ra'yi ururiye, kulannada khadka internetka ah, guddiyo loo xilsaaro arrin gooni ah, dib u eegista dukumintiyada, iyo falanqaynta xogta jirta. Guud ahaan, SPPS waxay heshay in ka badan 11,000 jawaabo oo qayb ka ah hawshan.

SPPS waxay ka heleysaa \$ 206.9 milyan oo ah maalgelinta dowladda federaalka ee Qorshaha Samatabixinta Mareykanka (ARP). ARP waa qoondada ugu dambaysa ee maalgelinta federaalka, wadar ahaanna ah \$ 334 milyan, oo SPPS ay heleyso si wax looga qabto natiijooyinka muddada dheer gaarsiisan ee ardayda kuwaasoo uu saameeyay safmarka COVID-19. Baahiyaha lagu tilmaamay hawshan qiimeynta ah waxaa loo isticmaali doonaa in la go'aamiyo sida maalgalintaas loo isticmaalayo saddexda sano ee soo socota.

Hoos waxaa ku qoran war kooban oo ku saabsan baahiyaha mudnaanta ugu sarreysa leh ee uu guddi walba aqoonsaday:



### ARDAYDA

1. Waxbarasho tayo sare leh
2. Dareen xoog leh oo ah soo dhawayn, bedqab, taageero ah xag shaqsiyeed, iyo xag xubin ka tirsan koox qowmiyadeed / dhaqan / midab iyo bulshada iskoolka
3. Cod buuxa oo ku lug leh waxbariddooda iyo waxbarashadooda



### ISKOOLLADA

1. Fahmida in iskoollada kala duwan ay leeyihiin baahiyo kala duwan
2. Diiradda iyo dabacsanaanta



### SHAQAALAHA

1. Wakhtiga
2. Filashooyinka xirfadeed ee waxbarid iyo waxbarasho taasoo dhaqan ahaan macne leh
3. Dhisidda bulshada



### QOYSKA iyo BULSHADA

1. Nidaamyada la joogteeyay oo ah bedqabka ardayga ku sugan iskoolka
2. Waxbarid iyo waxbarasho tayo sare leh taasoo diiradda saareysa horey u socodka
3. Metalaad ah xag jinsi, qowmiyadeed, ama luuqadeed
4. Aqoonsiga caqabadaha haysta qoysaska carruurta leh

Soo koobid ka mid ah qiimeynta baahida ee ARP ayaa lagu heli karaa Ingiriis ahaan lifaaqan:

[spps.org/Page/42080](https://spps.org/Page/42080). Fursadda xigta ee wax looga biirin karo qorshaha SPPS ee wax looga qabanayo

baahiyahaan ayaa bilaaban doonta dhammaadka xagaagan. Wixii xog dheeraad ah, booqo [spps.org/ARP](https://spps.org/ARP).